Barnmorskemottagningar, Regionhälsan
Patientinformation Fosterdiagnostik översatt till somaliska
Datum: 2026-08-28

Macluumaad guud oo ku saabsan baaritaanka hore ee uurjiifka (Tidig fosterdiagnostik)

Waxaa muhiim ah in la xoojiyo in dhammaan baaritaannada uurjiifka yihiin ikhtiyaari. Adiga uurka leh ayaa marwalba go'aaminaya in baaritaan la sameeynayo in kale.

Baaritaanka hore ee uurjiifka waxaa loola jeedaa baaritaannada la sameeyo ka hor 22 isbuuc dhammaystiran, laakiin baaritaannada badankood waxaa la sameeyaa wakhti intaas aad uga horeeya.

Haddii aad samaynayso baaritaanka uurjiifka, natiijada baaritaannada waxay muujin karaan khatarta in uurjiifku leeyahay khalkhal koromosoomyada (kromosomavvikelse) iyo/ama cillad qaab-dhismeed kale. Markaas waxaa lagu weydiinaya inaad rabto inaad marto baaritaanno dheeraad ah. Waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan cawaaqibta caafimaad iyo bulsho ee khalkhalkaas, iyo daryeelka la bixin karo. Markaas waxaad go'aansanaysaa inaad uurka sii wadato ama joojiso. Haddii aad shaki ka qabto arrinkan, waa inaad ka fiirsato in run ahaantii aad rabto inaad baaritaanka uurjiifka samayso. Xusuusnow in ultrasound-ka hore ee la bixiyo isbuuca 12–13 ee uurka iyo ultrasound-ka caadiga ah ee isbuuca 18–20 iyaguna yihiin baaritaan uurjiif.

Waxa kale oo muhiim ah in la xasuusto in xaalado qaar aan lagu ogaan karin baaritaanka uurjiifka. Xitaa haddii wax walba ay u muuqdaan caadi marka baaritaanka la sameeynayay, weli waxaa jira khatar yar oo ah in ay jiri karaan khalkhalyo saameyn kara caafimaadka uurjiifka.

Haddii aad hidde u leedahay khalkhalka koromosoomyada ama cudur la kala dhaxlo, waa inaad umulisadaada/dhakhtarkaaga war gelisaa.

Daryeelka caafimaadka dadweynaha wuxuu baaritaanka uurjiifka lacag la'aan u bixiyaa dhammaan kuwa uurka leh, iyadoo lagu saleynayo qiimayn caafimaad.

Haddii aad baaritaanka uurjiifka ku samayso bixiye daryeel oo gaar loo leeyahay, waxaa dhici karta in baaritaankaas oo kale aan laguu bixin daryeelka caafimaadka dadweynaha.

Weydii umulisadaada haddii tani adiga ku khuseyso.

Ultrasound-ka hore (Tidigt ultraljud, TUL)

Ultrasound-ka hore waxaa lacag la'aan loo siiyaa dhammaan dadka uurka leh ee Västra Götaland. Ultrasound-ka waxaa lagu sameeyaa caloosha, ujeedadiisuna waa in lagu go'aamiyo muddada uurka, lagu ogaado uur leh in ka badan hal uurjiif, iyo lagu ogaado cillado qaab-dhismeed oo halis ah.

Sida ugu habboon, baaritaanka waxaa la sameeyaa inta u dhexeysa isbuuca 12+4 – 13+6 ee uurka, laakiin waxaa la ballamin karaa ilaa isbuuca 15+0.

Khalkhalka koromosoomyada laguma ogaan karo TUL.

Ultrasound iyo baaritaan dhiig oo isku dhafan (KUB)

KUB waxaa lagu xisaabiyaa suurtagalnimada khalkhalka koromosoomyada oo leh koromosoom dheeraad ah (trisomi).

KUB wuxuu xisaabin karaa suurtagalnimada trisomi 21 (Downs syndrom) iyo laba khalkhal kale oo naadir ah oo ka sii halis badan (trisomi 13 iyo 18).

Waa muhiim in la ogaado in **aanu ahayn** KUB **hab** lagu **xaqiijiyo** trisomi si hubaal ah, ee waa hab lagu **qiimeeyo suurtagalnimada** trisomi.

Gobolka Västra Götaland waxaa KUB lacag la'aan loo siiyaa dhammaan kuwa uurka leh ee jiray 35 sano marka caadadu ugu dambeysay ku dhacaysay. **Marka laga reebo**: IVF lagu sameeyo deeqda ugxanta ama uurjiifka hore, sababtoo ah deeq-bixiyayaashu marwalba way ka yar yihiin 35 sano, sidoo kale marka IVF laga sameeyo qofka ugxantiisa oo barafaysan oona laga soo saaray ka hor da’da 35.

Isbuuca 9+0 – 13+6 ee waxaa kuwa uurka leh laga qaadaa baaritaan dhiig si loo cabbiro heerarka labo borotiin oo dhiigga ah. Baaritaan ultrasound oo caloosha ah waxaa la sameeyaa isbuuca 11+3–13+6, halkaas oo lagu cabbiro ballaca dareeraha qoorta uurjiifka (nackuppklarning, NUPP). Natiijooyinka baaritaannadan waxaa lala qiimeeyaa da'da qofka uurka leh si loo xisaabiyo suurtagalnimada in uurjiifku leeyahay trisomi. Waxaa ugu wanaagsan in baaritaanka dhiigga la qaado agagaarka isbuuca 10+0, baaritaanka ultrasound-ka la qorsheeyo isbuuca 12+4 – 13+6, maadaama markaas la sameyn karo TUL tayo wanaagsan leh oo taariikh leh.

KUB waa la sameyn karaa haddii ay jiraan in ka badan hal uurjiif. Markaas ayay mararka qaar adkaan kartaa in natiijooyinka lagu go'aansado, sidaas darteed taasina waxaa habboon qaadashada talo gaar ah.

Haddii KUB muujiyo suurtagalnimo sarreysa oo trisomi ah, waxaa la bixinaya baaritaanno dheeraad ah.

Non-invasive prenatal test (NIPT)

- NIPT waa hab lagu baaro DNA-ga uurjiifka iyadoo laga qaado baaritaan dhiig qofka uurka leh.

- NIPT sida KUB waa baaritaan muujiya suurtagalnimada khalkhalka koromosoomyada, balse leh heer saxsanaan ka sarreeya. Sida KUB oo kale, waxaa la qiimeeyaa suurtagalnimada trisomi 13, 18 iyo 21.
- NIPT waxaa la sameyn karaa laga bilaabo isbuuca 10-aad ee uurka iyo wixii ka dambeeya.

NIPT baaritaan ahaan ayaa loo siiyaa kuwa uurka leh:

- kuwaasoo baaritaanka KUB muujiyay suurtagalnimo sarreysa meel dhexaad oo trisomi ah (1:51-1:1000).
- kuwa baaritaanka biyaha uurjiifka/mandheerta sababo kala duwan awgood aan ku habboonayn (tusaale ahaan cagaarshow, HIV, u nuglaanta dhiig-baxa).

NIPT lama sameyn karo haddii qofka uurka leh:

- sido in ka badan hal uurjiif.
- leeyahay khalkhalka koromosoomyada.
- 3-dii bil ee la soo dhaafay helay:
  - beddelid xubin (sidoo kale beddelidda unugyada asalka)
  - ku-shubid dhiig
  - daaweyn shucaac
  - daaweynta difaaca jirka (immunterapi)

Baaritaanka biyaha uurjiifka/baaritaanka mandheerta

Baaritaanka waxaa laga qaadaa caloosha oo la galaa ilmo-galeenka. Iyadoo la adeegsanayo cirbad dhuuban, waxaa laga qaadaa muunad mandheerta ama unugyada ku jira biyaha uurjiifka.

Baaritaanka biyaha uurjiifka ama mandheerta badanaa waxaa lagu soo baaraa hab lagu helayo jawaab toddobaad gudahiisa ee khalkhalka koromosoomyada trisomi 13, 18 iyo 21 (QF-PCR).

- Baaritaanka biyaha uurjiifka waxaa ugu horreyn la sameyn karaa isbuuca 15+0 ee uurka.
- Baaritaanka mandheerta waxaa ugu horreyn la sameyn karaa isbuuca 11+0 ee uurka.
- Qaadista baaritaanka waxay kordhisaa khatarta dilanka <0,5%.

Baaritaanka waxaa la bixiyaa haddii:

- baaritaanka KUB muujiyo suurtagalnimo (1:2-1:50), ballaca dareeraha qoorta cabbiro ≥3,5mm, ama haddii NIPT muujiyo suurtagalnimo sare oo trisomi 13, 18 ama 21 ah
- baaritaanka ultrasound-ka keeno shaki ah in cillad qaab-dhismeed jirto
- ilmo hore ama uur hore oo lahaa khalkhal koromosoomyada
- hidde cudur dhaxalka uu leeyahay qofka uurka leh ama ehelka
- xaalado gaar ah marka 35 sano la gaaro oo la doonayo ka baaqsashada KUB, sidoo kale la rabo baaritaan khalkhalka koromosoomyada ah ee uurjiifta.

Ultrasound-ka caadiga ah (Rutinultraljud, RUL)

Ultrasound-ka caadiga ah waxaa si bilaash ah loo siiyaa dhammaan qof kastoo uur leh oo degganVästra Götaland.

Baaritaankan waa in la sameeyo inta u dhexeysa isbuuca 18–20 ee uurka, waxaana loo sameeyaa in:

- lagu go'aamiyo muddada uurka iyo lagu xisaabiyo taariikhda foosha (haddii tan hore lagu sameeyay ultrasound-ka hore (TUL), xisaabin cusub lama sameynayo).
- la arko tirada uurjiifta ee ku jira ilmo-galeenka (haddii TUL aan la sameyn)
- uurjiifka la baaro si loo ogaado cillado qaab-dhismeed oo halis ah
- la qiimeeyo meesha mandheerta taallo

Cillado qaab-dhismeed qaar way fudud yihiin in lagu arko ultrasound, waxaana lagu ogaadaa ku dhowaad marwalba (tusaale ahaan eernada xangullaha). Cillado qaab-dhismeed kale way adag yihiin in lagu ogaado (tusaale ahaan cilladaha qaar ee wadnaha).

Dhammaan khalkhalyada laguma ogaan karo ultrasound. Waxaa dhici karta xaalado naadir ah in si qaldan loo maleeyo in uurjiif caafimaad qabaa leeyahay cillad qaab-dhismeed. Waxa kale oo jira isbeddello oo waxa ay ka dhigan yihiin ay adag tahay in la qiimeeyo, hubanti la'aantaasna waxay dhib ku noqon kartaa waalidiinta.

Haddii qofka uurka leh doonayo inuu ogaado jinsiga uurjiifka, waa in umulisada la ogeysiiyo inta baaritaanka lagu jiro. Haddii jinsigu si la hubo oo macquul ah u muuqdo, umulisada way sheegaysaa.

Maxaa dhacaya ka dib – baaritaannada ka dib?

Inta badan wax walba way wanaagsan yihiin baaritaannada, ilmuhuna wuxuu ku dhashaa caafimaad qab.

Haddii baaritaannadu muujiyaan in wax ka duwan waxa la filayay jiro, marwalba waxaa la sameeyaa qiimeyn dheeraad ah oo dhakhtar sameeyo. Waxaa dhici karta in baaritaanno dhamaystir ah in loo baahdo, waxaana laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad rabto baaritaanka biyaha uurjiifka ama baaritaanka mandheerta.

Haddii la ogaado in uurjiifkaagu leeyahay khalkhal koromosoomyada iyo/ama cillad qaab-dhismeed kale, waxaad heli doontaa macluumaad ballaaran iyo fursad aad kaga hadasho iyo waxa tani ay ka dhigan tahay.

Qof shisheeye ah xaq uma laha inuu faragaliyo ama inuu isku dayo inuu saameeyo go'aanka qofka uurka leh. Mararka qaar si kastaba ha ahaato, waxaa fiican in lala hadlo dad badan oo aqoon leh, tusaale ahaan la-taliye hidde-sidaha (genetisk vägledare), dhakhtarka carruurta, cilmi-nafsi

yaqaan ama la-taliye bulsho (kurator), si loo gaaro go'aan adiga kugu habboon.

Waxa kale oo qiimo leh in la adeegsado linkiyo ee ka muuqda bogga ugu dambeeya si aad wax badan uga barato waxa uu ka dhigan yahay waalid u ahaanshaha ilmo naafanimo qaba.

Ma rabtaa inaad wax dheeraad ah ka ogaato baaritaanka uurjiifka?

Akhri macluumaadka isbitaalka degaankaaga uu ku bixiyo boggiisa internetka.

Talooyin linkiyo:

- Fosterdiagnostik - 1177
- http://www.svenskadownforeningen.se
- Svenskt nätverk för information kring fosterdiagnostik (SNIF)
- Ågrenska: Stöd vid Sällsynta hälsotillstånd - Ågrenska
- FUB - För barn, unga och vuxna med intellektuell funktionsnedsättning